


Macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha kooxda caafimaadka dadweynaha ee Greater Manchester

Jadeecada



Jadeecada waa mid kamid ah cudurrada aduunka ee aadka u faafa.

Tani waxay ka dhigan tahay inay fududahay si loo helo haddana ay fududahay in la faafiyo.



Dadku aad ayay u xanuunsan karaan ama xitaa way u dhiman karaan.



Haddii jadeecada kugu dhacdo markaad uur leedahay, waxay dhib u keeni kartaa dhalaankaaga.



Laakiin waxa jira tallaal badbaad ah oo kaa difaaci kara.

Buug-yarahaan waxay kuu sheegaysa waxa iyada ku saabsan.



Sida jadeecadu ay u faafto

Waxay ku faaftaa habka hawada marka qof uu qufaco ama hindhiso.




Calaamadaheeda maxay tahay?

Heerkul sarreeya iyo finan maqaarka ka soo baxa.



Dhibaato nooce ah ayay jadeecadu keeni kartaa?

Dadka waaweyn, iyo dhallaanka (ka yar 12 bilood) ayaa waxay u badan tahay inay la kulmaan dhibaatooyin kale.



Xaaladaha qaarkood Jadeecada waxay sababi kartaa caabuqa laabta, suuxdin, bararka maskaxda iyo dhaawaca maskaxda.



Carruurtu waxa laga yaabaa inay la seexdaan ilaa 5 maalmood oo ay dugsiga ka seegaan ilaa 10 maalmood.

Tallaal



Dugsiga ama dhakhtarkaaga ayaa ku weydiin doona in ilmahaaga la tallaalo. **Fadlan bixi ogolaanshahaaga**



Tallaalka waxa loo yaqaan MMR jab.

Waxay ilmahaaga ka diffaacdaa jadeecada, Qaamo-qashiirta iyo Rubella.



Marna ma aha wax laga daaho in is tallaalo. Ma jiro xadka da'da sare.

Dadka waaweyn ee aan la socon tallaalkooda waxay kala qabsan karaan Dhaqtoorka guud.



Haddii aanad hubin tallaalada MMR ee aad qaadatay waxa ay tahay, fadlan kala hadal bixiyaha daryeelahaaga caafimaadka waxay ay ku saabsan tahay.

NHS-taadu waxay sheegaysaa inaanu jirin xidhiidh ka dhexeeya tallaalkan iyo autismka. Waxaa si badbaado leh looga isticmaalaa adduunka oo dhan.



Kooxdayada caafimaadku waxay rabaan inay ku caawiyaan.

Fadlan la hadal oo weydii su'aalo kasta. Wax dheeraad ah ka ogow

www.nhs.uk/conditions/measles/